



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WARSAXAAFADEED 09/2010**

#### **Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay oo si kulul u cambaareynaya weerarkii qaraxa ahaa eel ala beegsaday masjid ku yaalla magaalada Muqdisho**

Nairobi, 2 May – Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Soomaaliya, Ahmedou Ould-Abdallah, wuxuu si kulul u cambaareeyay qaraxyadii shalay ka dhacay Masjidka Cabdalla Shideye ee ku yaalla suuqa Bakaaraha ee magaalada Muqdisho qaraxyadaas oo ay ku dhinteen kuna dhaawacmeen Soomaali badan iyo tiro kale oo dad shisheeye ah.

“Kan wuxuu ahaa weerar naxariis darra ah oo lala beegsaday dad masjidka u tagay inay ku dukadaan,” ayuu yiri Md. Ould-Abdallah. “weerradan oo kale waa in la cambaareeyaa.”

Ergeyga Gaarka ah wuxuu yiri weerarka lagu qaaday Suuqa Bakaaraha, oo ay ka taliyaan kooxaha xagjirka ah ee Dowladda ka soo horjeeda, wuxuu keliya sii kordhinayaa dhiigga daadanaya iyo colaadda dalka ku habsatay labaatankii sanno ee la soo dhaafay.

“Weli ma garanayno cidda qaraxyadan ka dambaysay, ulajeeddooda ama cidday ahaayeen dhibbanayaasha, laakiinse ugu dambeyntii waa dadka Soomaaliyeed cidda ay dhibaataadu ku dhici doonto,” ayuu yiri Md. Ould Abdallah. “falkan dani ugu ma jirto wadahal ama xasillooni ku soo celinta Soomaaliya.”

“Mar kale, anigoo ku hadlaya magaca Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay, waxaan Soomaalida ugu baaqayaa inay joojiyaan dilka aan loo meeldayin iyo inay dadaal ku bixiyaan siday u gaari lahaayeen mustaqbal nabad leh iyagoo eegaya dantooda, danta carruurtooda iyo ta dalkooda.”